Public Health Agency

# Talaalka loogu talagalay carruurta jira da'ada dugsiga xannaanada

## saddex sano iyo afar bilood jir



immunisation
the safest way to protect your child

Laga bilaabo 2026

# Hordhac

Buug-yarahan waxaa ku jira xaqiiqooyinka ku saabsan tallaallada la siiyo carruurta ka hor inta aysan dugsiga bilaabin. Tallaaladan waxaa ka mid ah tallaalka 4-in-1 ah si looga difaaco gawracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo cudurka dabaysha.

Laga bilaabo 2026, tallaalka busbuska ayaa waxaa lagu soo darayaa barnaamijka tallaalka carruurnimada oo ah tallaal isku dhafan oo lagu darayo MMR. Carruurta yaryar, waxaa la siin doonaa da'ada 12 iyo 18 bilood jir. Carruurta waaweyn, oo laga yaabo inay hore u qaateen tallaalka MMR, waxaa la siin doonaa tallaal MMRV ah xilliga ballantooda da'ada 3 sano iyo 4 bilood.

Haddii ilmahaaga uu dhashay inta u dhaxaysa 1 Sebtembar 2022 iyo 31 Diseembar 2024, waxaa la siin doonaa tallaalka MMRV xilliga ballantooda da'ada 3 sano iyo 4 bilood. Haddii aad rabto inaad ka hadasho macluumaadkan, fadlan la xiriir dhakhtarkaaga, booqdaha caafimaadka ama kalkaalisada caafimaadka.

Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad waxtar aragto inaad booqato: **pha.site/vaccinations** ama **www.nidirect.gov.uk/childhood-immunisation**





# Tallaalka gawracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo cudurka dabaysha (4-in-1)

Tallaalkani wuxuu ka hortaggaa 4 cudur oo kala duwan: Tallaalka gawracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo cudurka dabaysha.

**Ilmahaaga waa inuu qaataa qiyaastan markuu jiro saddex sano iyo afar bilood (kahor inta uusan bilaabin dugsiga).**

Waxaa la siin doonaa qiyaas dheeraad ah oo ka dhan ah Tallaalka gawracatada, teetanada iyo cudurka dabaysha inta u dhaxaysa 14 iyo 18 sano jir.

## Sideen ku ogaan karnaa in tallaalkani uu badbaado iyo waxtar leeyahay?

Tallaalka waa inuu maraa baaritaanno badan si loo xaqiijiyo inuu ammaan yahay iyo inuu shaqeynayo ka hor inta aan la siin qofna. Baaritaannadani way sii socdaan xitaa ka dib marka la soo bandhigo tallaalka. Kaliya tallaallada ka gudba dhammaan baaritaannada badbaadada ah ayaa la isticmaalaa. Dhammaan daawooyinka ayaa sababi kara waxyeellooyin gaar ah, laakiin tallaalladu waxay ka mid yihiin kuwa ugu badbaadada badan. Cilmi-baaris laga sameeyay adduunka oo dhan ayaa muujinaysa in tallaalka uu yahay habka ugu badbaadada badan ee lagu ilaalin karo caafimaadka ilmahaaga. Eeg bogga 6aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyeellooyinka gaarka ah.

## Cudduro noocee ah ayuu tallaalkani ka hortagi doonaa?



### Gawracatada

Gawracatada waa cudur halis ah oo si dhakhso ah u sababi kara dhibaatooyin neefsasho. Cudurkaas wuxuu dhaawici karaa wadnaha iyo habdhiska neerfaha, xaaladaha aadka u darana, wuxuu sababi karaa dhimasho. Kahor inta aan la soo bandhigin tallaalka gawracatada, waxaa jiray ilaa 1,500 oo kiis oo cudurka gawracatada ah sannad kasta ee gudaha Waqooyiga Ireland.

### Teetanada

Teetanada waa cudur xanuun badan oo saameeya muruqyada wuxuuna sababi karaa dhibaatooyin neefsasho. Wuxuu saameeyaa habdhiska neerfaha wuxuuna sababi karaa dhimasho. Teetanada wuxuu yimaadaa marka jeermiska laga helo ciidda iyo digada ay galaan jirka iyagoo u maraya meelaha uu jirka ka jeexan yahay ama ka gubsan yahay. Uma kala gudbi karo qof-ka-qof laakiin had iyo jeer wuxuu ku dhex jiraa ciidda, xitaa gudaha waddankan.

### Xiiqdheerta (xiiqdheer)

Xiiq-dheerta waa cudur sababi kara qufac dheer iyo ku dhegida neefta oo adkeyn karta neefsashada. Cudurka wuxuu socon karaa ilaa 10 toddobaad. Wuxuu noqon karaa mid aad halis ugu ah carruurta yaryar wuxuu xitaa dili karaa carruurta ka yar hal sano jir. Waxaa jiray in ka badan 3,000 oo kiis oo xiiqdheer ah oo la xaqiijiyay oo la soo sheegay sannadkii 2024.

Kororkaan dhawaantan ku yimid kiisaska cudurka ayaa muujinaya sida ay muhiim u tahay in la xaqiijiyo in ilmahaaga uu qaato dhammaan tallaallada loo qorsheeyay.

### Cudurka dabaysha

Cudurka dabaysha waa fayras weerara habdhiska neerfaha wuxuuna si joogto ah u curyaamin karaa muruqyada. Haddii uu saameeyo muruqyada laabta ama maskaxda, cudurka dabaysha wuxuu sababi karaa dhimasho. Kahor inta aan la soo bandhigin tallaalka cudurka dabaysha, ilaa 1,500 oo kiis oo curyaannimo ah oo uu sababay cudurka dabaysha ayaa sannad walba ka dhacayay Waqooyiga Ireland.



## Waxyeellooyinka gaarka ah ee tallaalka

Carruurta intooda badan ma yeelan doonaan wax waxyeellooyin gaar ah, laakiin dhammaan carruurta way kala duwan yihiin. Ilmahaaga wuxuu yeelan karaa qaar ka mid ah waxyeellooyinka gaarka ah ee soo socda, kuwaas oo badanaa khafiif ah:

- cuncun ilaa 48 saacadood ah ka dib marka la duro;
- qandho khafiif ah (eeg boggaga 16-17);
- buro (barar) yar oo ku soo muuqda meesha laga muday. Tani waxay socon kartaa ilaa dhowr toddobaad waxayna u baabi'I doontaa si tartiib ah.

Haddii aad u malaynayso in ilmahaaga uu yeeshay falcelin kale oo ka dhan ah tallaalka gawracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo cudurka dabaysha oo aad ka walaacsan tahay, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.

**Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxay soo sheegi karaan waxyeellooyinka gaarka ah ee laga shakisan yahay ee tallaallada iyo daawooyinka iyagoo isticmaalaya Yellow Card Scheme..**

I ISKAAN GAREEY

Waxaa sidaas la samayn karaa iyadoo la booqanayo **mhra.yellowcard.gov.uk** ama khadka taleefanka Yellow Card laga wacayo **0800 731 6789**. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa lambarka QR ama adigoo soo dejisanaya abka Yellow Card.



Si aad dhif u ah, tallaal ayaa waxaa laga yaabaa inuu sababo falcelin xasaasiyadeed, sida finan ama cuncun saameeya qaar ka mid ah ama dhammaan jirka. Xitaa si aad naadir uga sii ah, carruurta waxaa laga yaabaa inay falcelin daran la kulmaan dhowr daqiiqo gudahood ka dib qaadashada tallaalka, taasoo sababi karta neefsashada oo adkaata iyo suurtagalnimo ah inay suuxaan/dhacaan. Taasi waxaa loo yaqaanaa 'anaphylaxis'.

Daraasad dhowaan la sameeyay ayaa muujisay in wax ka yar 1 kiis oo 'anaphylaxis' ah laga soo sheego halkii milyan oo tallaal ee la bixiyo. In kasta oo falcelinada xasaasiyadeed ee aadka u daran (anaphylactic) ay yihiin kuwo walaac leh marka ay dhacaan, dadka bixiya tallaallada waxaa loo tababaray inay la tacaalaan falcelinada aadka u daran, daaweynta ayaana waxay u horseedi doontaa soo kabasho degdeg ah oo buuxda.

Marar dhif ah, carruurtu waxay yeelan karaan encephalitis (barar maskaxda ah) ka dib qaadashaa tallaalka MMRV. Tani waxay badanaa la xiriirtaa yeelashada heerkul aad u sarreeya (fiiri bogga 17). Haddii ilmahaaga uu la kulmo qallal ka dib qaadashada tallaalka, waa inaad raadsataa talo caafimaad oo degdeg ah. Haddii xaruntaada caafimaadka ay xiran tahay ama haddii aadan la xiriiri karin dhakhtarkaaga, si toos ah u tag waaxda gurmadka degdegga ah ee isbitaalka kuugu dhow. Carruurta badanaa si dhakhso leh oo dhammaystiran ayay uga soo kabsadaan qallalka.

Carruurtaada waxay la kulmi karaan qallalka wakhti kasta, sidaas darteed inay la kulmaan qallal ka dib markasta oo ay qaataan tallaalkooda khasab ma ahan in lala xiriiriyo tallaalka. Dhakhtarkaaga wuxuu go'aamin doonaa in ilmahaaga uu qaadan karo qiyaaso badan oo tallaalka ah.



# Tallaalka MMRV

Tallaalka MMRV wuxuu ilmahaaga ka difaacaa jadeecada (M), qaamo-qashiirta (M), jadeeco-jarmalka (R; jadeecada Jarmalka) iyo varicella (V; busbuska).

Tallaalada ay ku jirto MMR waxaa halkan lagu bilaabay isticmaalkooda sannadkii 1988. Tan iyo markaas, tirada carruurta qabta cudurradan ayaa hoos ugu dhacday heerkii ugu hooseeyay ee abid

## Waa maxay sababta ilmahayga uu hadda ugu baahan yahay tallaalka cusub ee MMRV?

Carruurta yaryar, waxaa la siin doonaa da'ada 12 iyo 18 bilood jir. Carruurta waaweyn, oo laga yaabo inay hore u qaateen tallaalka MMR, waxaa la siin doonaa tallaal MMRV ah xilliga ballantooda da'ada 3 sano iyo 4 bilood.

Haddii ilmahaaga uu **dhashay intii u dhaxaysay 1 Luulyo 2024 iyo 31 Diseembar 2024**, oo ay qaateen qiyaas tallaalka MMR ah wax yar ka dib sannadguuradooda koowaad, waxaa la siin doonaa qiyaas tallaalka MMRV ah xilliga mid kasta oo ka mid ah ballamahooda 18 bilood, iyo 3 sano iyo 4 bilood.

Tani waxaa loogu talagalay in lagu siiyo difaac wanaagsan oo ka dhan ah busbuska (busbus). Qaadashada 3 tallaal oo ay ku jiraan MMR ma sababayso wax walaac xagga badbaadada ah.

Waxaa la filayaa in maadaama lagu soo daray qayb cusub oo ah varicella, kiisaska busbuska ee lagu arko carruurta ay si weyn u yaraan doonaan. Barnaamijka wuxuu yareyn doonaa kiisaska busbuska ee daran, dhibaatooyinka la xiriira iyo isbitaal dhigista.

## Waa maxay jadeeco?

Jadeecada waxaa sababa fayras aad u faafa. Ku dhawaad qof kasta oo uu ku dhaco wuxuu yeelan doonaa qandho sareysa, finan iyo guud ahaana wuu xanuunsan doonaa. Dhibaatooyinka jadeecada waxaa ka mid ah caabuqyada laabta/xabadka, qallal (suuxdin), encephalitis (caabuqa maskaxda), iyo dhaawaca maskaxda. Xaaladaha aadka u daran, jadeecada waxay sababi kartaa dhimasho.

## Waa maxay qaamo-qashiir?

Qaamo-qashiir waxaa sababa fayras kaasoo sababi kara qandho, madax-xanuun, iyo qanjirada wejiga, qoorta iyo daanka oo barara. Wuxuu sababi karaa dhego-beel joogto ah, meningitis iyo encephalitis (caabuqa iyo bararka maskaxda).

## Waa maxay jadeeco-jarmal?

Jadeeco-jarmalka (Jadeecada Jarmalka) waa cudur uu sababo fayras. Carruurta badanaa waa mid u fudud oo aan la dareemin. Si kastaba ha ahaatee, jadeeco-jarmalka xilliga uurka aad ayay ugu daran tahay carruurta aan weli dhalan. Waxay si xun u dhaawici kartaa aragooda, maqalkooda, wadnahooda iyo maskaxdooda. Xaaladdaas waxaa loo yaqaanaa cudurka jadeeco-jarmalka ee lagu dhasho (congenital rubella syndrome, CRS).

## Waa maxay varicella (busbus)?

Busbuska (busbus) waa cudur aad u faafa oo uu sababo fayras. Busbusku aad buu caam u yahay wuxuuna saameeyaa carruurta badankood inta lagu jiro carruurnimada, inkastoo la qaadi karo da'a kasta marka ugu horreysa. Waxaa lagu kala qaadaa taabashada tooska ah ee dadka, ama si dadban iyada oo la isku marsiinayo dhibcaha hawada. Inta badan kiisaska busbuska ee carruurta waa kuwo khafiif ah cudurkuna wuu baaba'aa iyada

oo aan loo baahanin daaweynta xirfadle caafimaad, inkastoo carruurta badankood ay xanuunsadaan ilaa dhowr maalmood ayna ka maqnaan doonaan dugsiga ama xarunta xanaanada carruurta 5 maalmood ama wax ka badan. Waalidiinta waxaa laga yaabaa inay ku qasbanaadaan inay fasax ka qaataan shaqada si ay u daryeelaan carruurtaas. Si kastaba ha ahaatee, carruurta qaar ayaa dhibaatooyin kala kulma busbuska, oo ay ku jiraan caabuqa bakteeriyada ee nabarrada maqaarka iyo xaaladaha naadirka ah, encephalitis (bararka maskaxda), oof-wareenka (caabuqa sambabada) iyo istaroog. Dhibaatooyinkan caafimaad waxay sababi karaan isbitaal dhigis marar aad dhif u ahna waxay sababi karaan dhimasho.

**Jadeecada, qaamo-qashiirka, jadeeco-jarmalka iyo busbuska dhammaantood waxay yeelan karaan dhibaatooyin halis ah.**

## Waa maxay sababta ilmahayga uu ugu baahan yahay in ka badan hal qiyaas oo ah tallaal ka kooban MMR?

In kasta oo jadeecada iyo qaamo-qashiirka ay ku yar yihiin UK, haddana carruurta aan la talaalin weli waxay halis ugu jiraan inay qaadaan caabuqyada. Qiyaaso dheeraad ah oo tallaalka ah ayaa heerka ugu wanaagsan ee difaaca siin doona dadka ugu badan.

Ka dib qaadashada qiyaasta koowaad, inta u dhaxaysa 5% iyo 10% carruurta ayaan ka difaacnayn mid kasta oo ka mid ah cudurrada. Tani waxaa sabab u ah in habdhiska difaaca jirkooda uusan ka jawaab celinin qiyaasta koowaad. Ka dib qaadashada laba qiyaasood oo MMR ah, wax ka yar 1% carruurta ayaan ka difaacnayn cudurka jadeecada.

Tallaalka awgiis, tirada kiisaska jadeecada, qaamo-qashiirka iyo jadeeco-jarmalka ayaa hoos u dhacay. Si kastaba ha ahaatee, cudurradani ma aysan dhammaan waxaana adduunka oo dhan ka jiray dillaacyo jadeeco ah sannadihii ugu dambeeyay oo ay ka mid yihiin UK iyo Yurub. Laba qiyaasood oo ah tallaalka isku dhafan ee MMR ayaa si joogto ah looga bixiyaa Yurub oo dhan iyo sidoo kale Mareykanka, Kanada, Australia iyo New Zealand. Ku tallaalida ilmahaaga tallaalka MMRV wuxuu siin doonaa difaaca ugu fiican.

## MMRV ma leeyahay wax waxyeellooyin gaar ah?

MMRV wuxuu ka kooban yahay 4 tallaal oo kala duwan oo la isugu geeyay hal duritaan. Tallaaladu waxay shaqeeyaan waqtiyo kala duwan. Qiyaastii 5 ilaa 11 maalmood ka dib qaadashada tallaalka, carruurta qaar ayaa yeesho qandho, waxay yeeshaan finan u eg finanka jadeecada waxayna ka go'aan cunista cuntadooda marka qaybta jadeecada ee tallaalka ay bilowdo inay shaqeyso.

Si dhif ah, finan yaryar oo u eg nabarro ayaa soo muuqan kara 6 toddobaad gudahood ka dib qaadashada tallaalka, badanaa waxaa sababa qaybta jadeecada ama jadeeco-jarmalka ee tallaalka. Haddii ay waxaas ay ka soo baxaan, ilmahaaga u geey dhakhtarka.

Si dhif ah, qiyaastii 3 toddobaad ka dib ku duritaanka tallaalka, ilmaha wuxuu yeelan karaa astaamo u eg astaamaha qaamo-qashiirka (qandho iyo qanjirada oo barara) marka qaybta qaamo-qashiirka ee MMRV ay bilowdo inay shaqeyso.

Finan khafiif ah oo u eg kuwa busbuska ayaa laga yaabaa inay soo baxaan ka dib qaadashada tallaalka, finankaas oo ka soo baxa meel u dhow goobta duritaanka laakiin waxay ka soo muuqan karaan meelo kale. Finankan uma baahna daaweyn waxayna u baaba'aan si iskood ah.

Haddii ilmahaaga uu yeesho finan, ka taxaddar ahaan ka ilaali inuu xiriir dhow/taabasho la sameeyo dadka u nugul caabuqa busbuska, sida dadka habdhiska difaaca jirkooda uu daciifka yahay, haweenka uurka leh ee aan waligood qaadin busbuska iyo dhallaanka aan hooyooyinkood qabin busbuska. Si kastaba ha ahaatee, fursadda ah in busbuska laga qaado finankan ka dib marka la qaato tallaalka MMRV aad ayay u hooseysaa.

Qiyaastii 1 ka mid ah 1,000kii qofba wuxuu la kulmi doonaa suuxdin ay sabab u tahay heerkul sareeya (bogga 14 sida loo daaweeyo qandhada). Ma jirto wax caddayn ah oo muujinaya in tani ay sababayso dhibaatooyin muddo dheer sii jiraya. Ilmaha qaba jadeecada ayaa shan jeer uga dhow inuu la kulmo suuxdinta ka dhalata cudurka (5 ka mid ah 1,000kii qofba).

Tallaaladu waxay sidoo kale sababi karaan falcelin xasaasiyadeed. Falcelinadaas aad bay naadir u yihiin, wax ka yar 1 ka mid ah halkii milyan oo tallaal ah. In kasta oo falcelinada xasaasiyadeed ee aadka u daran (anaphylactic) ay yihiin kuwo walaac leh marka ay dhacaan, dadka bixiya tallaallada waxaa loo tababaray inay la tacaalaan falcelinada aadka u daran, daaweynta ayaana waxay u horseedi doontaa soo kabasho degdeg ah oo buuxda.

Marar dhif ah, carruurtu waxay yeelan karaan encephalitis (barar maskaxda ah) ka dib qaadashaa tallaalka MMRV. Si kastaba ha ahaatee, haddii ilmo aan la tallaalin uu ku dhaco cudurka jadeecada, fursadda ah inuu la kulmo encephalitis ayaa aad u sarreysa.

Isbarbardhigga waxyeellooyinka MMRV iyo waxyeellooyinka jadeecada, qaamo-qashiirka, jadeeco-jarmalka ama busbuska ayaa muujinaya in tallaalka uu aad uga badbaado badan yahay cudurrada.

## Xaqiiqooyinka ku saabsan tallaalka MMRV

- Tallaalka MMRV wuxuu carruurta ka difaacaa jadeecada, qaamo-qashiirka, jedaaco-jarmalka iyo varicella (busbuska).
- In ka badan 40 sano, in ka badan 500 milyan oo qiyaasood oo tallaalka MMR ah ayaa laga bixiyay qiyaastii 100 waddan. Tallaalka wuxuu leeyahay diiwaan badbaado oo aad u fiican.
- Ma jirto wax caddayn ah oo muujinaya xiriir ka dhexeeya MMR iyo cudurka ootisimka.
- In tallaallada si gooni-gooni ah loo bixiyo waxay noqon kartaa mid waxyeello leh. Waxay carruurta u furaysaa khatarta ah inay qaadaan jadeecada, qaamo-qashiirka, jadeeco-jarmalka ama busbuska.
- Hadba meesha laga heli karo MMRV, ma jiraan waddamo ku taliyay in dhammaan tallaallada si gooni-gooni ah loo bixiyo.
- In kasta oo hal tallaal oo MMRV ah ay ku jirto maadada jelatiinka doofaarka, haddana waxaa jira tallaal beddel u ah. La hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka si aad u hesho wixii macluumaad ah.
- Sannadkii ka horreeyay soo bandhigida tallaalka MMR ee UK, 86,000 oo carruur ah ayaa qaaday jadeeco 16 kalena way dhinteen. Sabab la xiriirta qaadashada tallaalka oo yaraa awgeed, waxaa dhawaanahan UK iyo Yurub ka jiray dillacyo cudureed waxaana ku dhintay carruur.

## Carruurta dabagal ma lagu sameeyay ilaa muddo dheer ka dib qaadashada tallaallada MMR si loo ogaado inuu tallaalka badbaado yahay?

Tallaallada isku dhafan ee MMR waxaa la bixinayay in ka badan 40 sano waxaana la isticmaalay in ka badan 500 milyan oo qiyaasood. Badqabkiisa waxaa si taxaddar leh loogala socday

waddamo badan waxaana la muujiyay inuu yahay tallaal aad waxtar u leh oo leh diiwaan badbaado oo heer sare ah.

**MMRV waa habka ugu badbaadada badan ee aad ilmahaaga uga ilaalin karto jadeecada, qaamo-qashiirka, jadeeco-jarmalka iyo busbuska.**

## Miyaysan fiicnaan lahayn in carruurta si gooni-gooni ah u qaataan tallaallada MMRV?

Maya, in tallaallada si gooni-gooni ah loo siiyo waxay ka dhigan tahay duritaano badan waxayna taasi carruurta ka dhigi doontaa inay la dhibtoodaan qaar ka mid ah cudurrada ilaa muddo muddo dheer. Cudurradani waxay noqon karaan kuwo halis ah oo xitaa dilaa ah.

## Su'aalaha caamka ah

### Badbaado miyaa in la qaato tallaallo kala duwan hal booqasho (tallaallo isku dhafan)?

Haa, waa mid badbaado leh in la qaato tallaallo kala duwan hal booqasho. Tallaalada isku dhafan waa kuwo badbaado ah oo waxtar leh si la mid ah marka tallaallada loo bixiyo gooni-gooni. Hal booqasho ku qaadashada tallaallo dhowr ah ama tallaallo isku dhafan waa muhiim si carruurta looga difaaco cudurro kala duwan sida ugu dhakhsaha badan. Tani waxay sidoo kale sahlaysaa in la dhammaystiro qiyaasaha lagu taliyay waqtigii loogu talagalay.

Qaadashada qiyaaso badan sidoo kale culays ma saarayso nidaamka difaaca jirka. Aragti ahaan, ilmaha wuxuu si wax ku ool ah uga jawaab celin karaa qiyaastii 10,000 oo tallaal oo uu qaato hal mar. Habdhiska difaaca jirkeena si fudud ayuu ula qabsan karaa tirada tallaallada ee ku jira jadwalka tallaalka caadiga ah.

### Ma jiraan sababo qasbaya in ilmahayga aan lagu tallaalin tallaalka gawracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo cudurka dabaysha (4-in-1) ama MMRV?

Waxaa jira sababo aad u tiro yar oo qasbaya in ilmahaaga aan la tallaalin. Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka haddii ilmahaaga:

- uu qabo heerkul aad u sarreeya ama qandho;
- uu qabo suuxdin ama qallal;
- uu falcelin taban kala kulmay tallaal;
- uu leeyahay xasaasiyad aad u daran;
- uu qabo xanuun dhiigbax ah;
- uu soo qaatay ama hadda uu qaadanayo daaweynta kansarka;
- uu qabo cudur saameeya habdhiska difaaca jirka (sida kansarka dhiigga, HIV ama AIDS);
- uu qaadanayo daawo saameysa habdhiska difaaca jirka (tusaale ahaan, steroids-ka qiyaasta sareysa leh ama daawaynta la bixiyo ka dib xubin-ku-beerista xubnaha ama daawooyinka loogu talagalay kansarka);
- uu qabo cudur kale oo halis ah.

Kuwani had iyo jeer macnaheedu maaha in ilmahaaga aan la tallaali karin laakiin waxay ka caawinayaan dhakhtarka ama kalkaalisada inay go'aamiyaan tallaalada ugu fiican ilmahaaga iyo inay u baahan yihiin inay ku siiyaan talooyin kale. Taariikhda cudurkada qoyska marnaba sabab loogama dhigi karo in ilmaha aan la tallaalin.

### Maxaa dhacaya haddii ilmahayga uu yeesho heerkul sareeya ka dib qaadashada tallaalka?

Waxyeellooyinka gaarka ah ee ka dhasha tallaallada waa kuwo aan caam ahayn, badanaa waa kuwo fudud oo si dhakhso ah u baaba'a. Carruurta qaar ayaa laga yaabaa inay yeeshaan heerkul sareeya ama qandho (ka badan 37.5°C). Haddii wejiga ilmahaaga uu yahay kulayl marka la taabto oo uu u muuqdo casaan, waxay u badan tahay inay qabaan qandho. Waxaad heerkulkiisa ku hubin kartaa heerkulbeeg.

Qandhada waa wax caadi ah oo ku dhaca dhallaanka iyo carruurta. Badanaa waxay ku dhacdaa markay qabaan caabuqyo. Mararka qaarkood qandhada waxay sababi kartaa in ilmaha uu qallalo. Qandho kasta ayaa sababi kartaa arrintaas, hadday qandhadu tahay mid uu sababay caabuq ama tallaal. Sidaas darteed waa muhiim inaad ogaato waxa la sameeyo haddii ilmahaaga uu yeesho qandho. Xusuusnow, qandhada waxay u badan tahay inay ka timaado cudurrada marka loo barbardhigo tallaallada.



## Sida loo daweeyo qandho

1. Ilmahaaga qabooji adigoo xaqiijinaya:
   - inaysan saarnayn lakabyo badan oo dhar ama bustayaal ah;
   - in qolka ay ku jiraan uusan ahayn mid aad u kulul (waa inaanu qabow noqon sidoo kale, laakiin waa inuu ahaadaa mid qabowgiisa raaxo ah).
2. Inaad siiso cabitaanno badan oo qabow
3. Inaad siiso barastamoolka dhallaanka (waydii midka aan sonkorta lahayn). Si taxaddar leh u akhri tilmaamaha ku yaala dhalada daawada oo sii ilmahaaga qiyaasta saxda ah ee loogu talagalay da'dooda. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad siiso qiyaas labaad kd ib afar ilaa lix saacadood.

**Xasuusnow, waligaa daawooyin aspirin ku jirta ha siin carruurta ka yar 16 sano.**

**Isla markiiba wac dhakhtarka haddii ilmahaaga:**

- uu yeesho heerkul aad u sarreeya (39°C ama ka sarreeya);
- uu la kulmo qallal/suuxdin.

Haddii ilmahaaga uu la kulmo suuxdin, dhinac-dhinac u jiifi meel badbaado leh sababtoo ah waxaa la yaabaa in jirkooda uu ruxmo ama gariiro.

# Jadwalka tallaalada carruurnimada ee joogtada ah

Jadwalkani wuxuu waxyar ka duwanaan doonaa jadwalka loogu talagalay ilmaha dhashay ka hor 31 Diseembar 2024. Iskaan gareey QR koodhka ama booqo **nidirect.gov.uk/childhood-immunisation** si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

Tallaalka loogu talagalay carruurta ilaa hal sano jir ah




**8** toddobaad jir
- 6-in-1
- Rotavirus
- MenB

**12** toddobaad jir
- 6-in-1
- Rotavirus
- MenB

**16** toddobaad jir
- 6-in-1
- Pneumococcal

Tallaalka loogu talagalay carruurta yaryar ka dib sannadguuradooda koowaad




**1** sano jir (ka dib sanadguuradooda koowaad)
- MMRV
- MenB
- Pneumococcal

Tallaalka loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 18 bilood




**18** bilood
- 6-in-1
- MMRV




Ka ilaalinta ilmahaaga ifilada. Tallaalka loogu talagalay ilmahaaga yar ama ilmaha jira da'ada dugsiga xannaanada

**2+** sanno
- Tallaalka hargabka carruurta (sannadle ah)

Talaalka loogu talagalay carruurta jira da'ada dugsiga xannaanada, saddex sano iyo afar bilood jir




**3** sano iyo **4** bilood
- 4-in-1

**Haddii ilmahaaga uu seegay mid ka mid ah tallaalladan, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.** Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalladan, booqo **pha.site/vaccinations**

**6-in-1** wuxuu ka difaacaa gawracatada, teetanada, xiiqdheerta (xiiq-dheer), cudurka dabeysha, Hib iyo cagaarshowga B

**4-in-1** wuxuu ka difaacaa gawracatada, teetanada, xiiqdheerta (xiiq-dheer) iyo cudurka dabeysha



Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, booqo

pha.site/vaccinations

ama

www.nidirect.gov.uk/childhood-immunisation

Public Health Agency

**Public Health Agency**
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Find us on:

Daabacaaddan waxaa laga soo qaatay macluumaad asal ahaan ay soo saartay Hay'adda Amniga Caafimaadka ee UK waxaana lagu isticmaalaa Laysinka Furan ee Dowladda v 3.0

12/25